



Warbixinta guddiga: Qorshaha weyn ee dib loogu dhisayo Dugsiga Sare ee Madison oo la ansixiyay

Dib u dhiska la qorsheeyay ee Dugsiga Sare ee Madison ayaa talaabo weyn hore u qaaday markii ay Guddiga Waxbarashada ee Dugsiyada Dadweynaha Portland ay ansixisay qorshaha weyn ee loogu talagalay mashruuca.

Iyada oo lagu ansixiyay cod gaaraya 7-0 kulankeedii dhacay Maajo 22, Guddigu waxay ansixisay Qaraarka 5654, kaasi oo lagu oggolaaday qorshe lagu dhisayo dhisme la casriyeeyay oo dhan 298,000-square-foot oo awood u leh in ay wax ku bartaan 1,700 arday.

“Caawa waxaa la qaaday talaabo muhiim ah,” ayay sheegtay Guddoomiyaha guddiga Julia Brim-Edwards.

Dib u dhiska waxaa lagu maalgelin doontaa xeerka maalgelinta daymeed ee 2017 ee ay ansixiyeen cod bixiyayaasha Portland. Maalgelinta daymeed waxaa sidoo kale lagu maalgelin doonaa dhismaha cusub ee Dugsiga Dhexe ee Kellogg iyo dib u cusboonaysiinta dugsiyada sare ee Benson iyo Lincoln.

Dhismaha Madison, waxaa ku bixi doonta inta u dhaxaysa \$181 malyuun ilaa \$196 malyuun, wuxuuna bilaabmi doonaa xagaaga 2019. Fasallada Madison waxay u guuri doonaan dhismaha Dugsiga Sare ee Marshall muddo laba sano ah ka hor inta aanay ardayda iyo shaqaaluhu dib u soo guurin bilowga sanad dugsiyeedka 2021-22.

Naqshadu waxay maamuus siin doontaa juqraafiga gaarka ah ee degaanku leeyahay iyada oo lagu dari doono dhaqamada kala duwan ee ardayda. Ka dib markii daraasad lagu ogaaday in ardayda Madison ay kafateeriyyada isticmaasho in ka badan dugsiyada kale, naqshad sameeyayaashu waxay qorshaheeda dejiyeen goobaha dadka ka dhexeeya oo aad u weyn oo bedeli doonta kafateeriyyada hadda jirta iyada oo u dhawaan doonta albaabka hore.

Qorshayaasha kale waxaa ka mid ah dib u dhisida garoomada kubadaha baseball-ka iyo softball-ka taasi oo ka turjumi doonta hab caddaalad ah oo lagula dhaqmayo labada ciyaarood, kuwaasi oo leh caws cusub oo degmada u ogolaanaya in ay aad u isticmaasho. Qaybta muhiimka ah ee garoonka ayaa la dhisi doonaa si ay u fariistaan 2,000 oo daawadaayaal ah.

Goobta wax lugu soo bandhigo ee dugsiga, oo hadda ay fariistaan qiyaastii 1,300, ayaa la yareyn doonaa qiyaastii saddex meelood waxaana laga dhigi doonaa masrax casri ah. Isbedelada kale waxaa ka mid ah meelaha baabuurta la dhigto iyo meelaha baaburtu ka soo gelaan oo la cusbooneysiiyay kuwaasi oo gacan ka geysan doona socodka gaadiidka isla marka yareyn doona ciriiriga maalin kasta ka jira jidka 82nd Avenue.

Si aad u fiiriso qoryashaal dheeraad ah, fiiri bogga 510 ee [warbixinta qorshaha weyn](#).

Isbedel kale oo ay sameysay Guddigu:

- Iyada oo lagu ansixiyay cod gaaraya 6-0 (xubinta Scott Bailey ma joogin qaybtii hore ee kulanka), Guddigu waxay ansixisay Qaraarka 5653, kaasi oo lagu dejiyyay siyaasad ka soo horjeeda kala soo dhaweysiga 'nepotism' ee degmada. ([Akhri siyaasadda](#).) Nidaamkani waa qaybta koowaad ee yagleelida siyaasadda weyn ee loo dejiyyay danta is-khilaafaya ee Guddigu ku hawlan tahay.
- Guddigu waxay qabteen akhriskii ugu horreeyay ee dib u eegida siyaasadda fayo-qabka ardayda ee degmada. Siyaasadda dhammeystiran, ee daboolaysa meelaha sida nafaqada, waxbarashada jirka, cuntooyinka caafimaadka leh iyo dhaqdhaqaqa jireed, waxay ka tarjumi doontaa waajibaadyada cusub ee gobolka. Qaraarka lagu ansixinayo isbedelka la geliyay 21 maalmood oo ah waqtii uu dadweynuhu faallo kaga dhiibto. ([Fiiri isbedelada la soo jeediyay](#).)
- Guddigu waxay dhageysatay warbixin hore oo ku saabsanayd qorshayaasha isbedelka ee astaanta iyo naanaysta Dugsiga Sare ee Franklin, taasi [oo amar lagu bixiyay kulankeedii Maajo 8](#). Shaqaalaha ayaa la shaqeynaya maamulaha Franklin ee Juanita Valder si loo dhiso guddi magacaabis oo ay ka mid noqon doonaan ardayda, xubnaha bulshada ka tirsan iyo ardaydii hore uga qalin jabisay, iyaga oo ka shaqeynaya in ay dhammeystiraan tilmaamaha maamulka oo ku saabsan nidaamka. Nidaamka magac cusub bixintu wuxuu bilaabmi doonaa Ogoosto, iyada oo Guddigu dejisay in waqtiga kama dambeysta ahi noqdo Juune 20, 2019 si loo dhammeystiro astaanta cusub.
- Guddigu waxay sharaftay ardaydii tacliinta heerka sare ka gaartay ee loogu talagalay fasalka qalin jabinaya 2017-18. ([Fiiri liiska oo dhammeystiran](#))